CHILD CARE LAW CENTER

P.O. Box 9066 • Berkeley, CA 94709
415-558-8005 • info@childcarelaw.org
www.childcarelaw.org

# Ogow sharciga ku saabsan Xanaanada Ilmaha Guriga Dhexdiisa ee ku qoran Guryaha Kirada ee California (California Rental Property)

## Xeerarka ay tahay in Kiraystayaashu Ogaadaan

**Kiraystayaashu guriga dhexdiisa xanaanada ilmaha ma dhex furan karaan?**

**Haa**. Kiraystayaasha iyo xubnaha ururrada mulkiilayaasha guryaha dhexdiisa way ka furan karaan xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa (xanaano ilmo oo ay gurigooda dhexdiisa ka dhex furtaan.[1]

Waxaad guriga dhexdiisa uga dhex furi kartaa
- Ilaa 6 carruur adiga qaata shatiga daryeelka ilmaha ee guriga iska yar ee qoyska, **ama**
- Ilaa 12 carruur adiga qaata shatiga daryeelka ilmaha ee guri wayn ee qoyska.[2]

**Ka warran haddii mulkiilaha gurigayga yiraahdo heshiiskayga ijaarka ma ogola in guriyaha aad ku dhex furato daryeelka carruurta qoyska?**

Haddii heshiiska ijaarka ama "kireysiga" ay ku qoran tahay dhahayso in guriga
- dhexdiisa ka ma furan kartid xanaanada ilmaha, **ama**
- dhexdiisa aadan ku samayn karin ganacsi ama hawlo ganacsi –

qaybahan heshiiskaaga waad iska indho tiri kartaa sababtoo ah adiga ku ma khuseeyaan haddii aad tahay qof guriga dhexdiisa ilmo ku qabanaya. [3]

Haddii aad haysato shatiga daryeelka ilmaha ee guriga dhexdiisa, waxaad ilmaha ku qaban kartaa
- Gurigaaga caadiga ah ama guryaha dabaqa ah;
- Abaartment, kondomiiniyan, tawnhaawuska;
- Qaybaha guryaha ee ijaarka ee ku dhexyaala noocyada kale ee dhismayaha ee qoysas badan; .[4] **ama**
- Guryo guurguura iyo guryo la warshadeeyay. [5]

Sida uu qabo sharciga California, gurigaaga ijaarka dhexdiisa ilmo xanaano ah waad ku haysan kartaa. Tan waxay sabab u tahay – sharci ahaan – ilmo guriga lagu dhex xanaaneeyo micnaheedu ma aha "ganacsi" ama "komershal" guri dhexdiisa ah.[6]

**Milkiilaha gurigayga guriga ma iga saari karaa maadaama guriga dhexdiisa aan ilmo ku dhex xanaaneeyo darteed?**

**Maya** Waa sharci-darro in mulkiilahaagu uu ku saaro *kaliya* sababtoo ah qorshayga aad qorshaynayso ama guriga dhexdiisa aad ilmaha ku hayso darteed. [7]

**Laakin** mulkiilahaaga guriga *guirga* wuxuu kaaga saari karaa sababo kale oo sharci ah, sida lacagta ijaarka oo wakhtigeeda ku bixin waydo ama guriga aad waxyeelo u gaysato darteed. Weli waad inaad raacdaa dhammaan sharciyada kale ee heshiiskaaga ku qoran.

**Ka warran haddii mulkiilaha gurigayga sababo kale uu igaga saaro, laakiin sababta dhabta ah ay tahay xanaanada ilmaha oo aan gurigayga dhexdiisa ku hayso drteed ay tahay?**

Waa sharci-darro in mulkiilahaagu uu guriga kaaga saaro sababo kale dartood *haddii* sababta dhabta ah ay tahay guriga dhexdiisa aad si sharci ah aad guriga ugu haysato darteed.

Haddii tan ay dhacdo:
- Meel dhigo wixii koobi ah ee dhammaan waraaqaha, qoraalada, iyo ogeysiisyada mulkiilahaaga ama qofka kale ee mas'uulka ka ah gurigaaga ijaarka ah aad ka hesho oo dhan.
- Meel dhigo qoraalada saabsan dhammaan wada sheekaysiga mulkiilahaaga. Qoro taariikhaha iyo meelaha wada-hadalladan idinku dhex maray.

**Mulkiiluhu ma diidi karaa inuu iga kireeyo sababtoo ah aniga waxaam *qorshaynayaa* in guriga aan degannahay aan ilmo xanaano aan ka dhex samaysto?**

**Maya**, Waa sharci-darro in mulkiilahaagu uu guriga kuu diido kaliya sababtoo ah qorshahaaga ah ama guriga dhexdiisa aad ilmaha ku hayso darteed. [8]

**Ma inaan milkiilahayga u sheegaa naan ahay qof guriga dhexiisa ilmo ku xanaaneeyo?**

**Haa.** Milkiilahaaga waa in qaab *qoraal ah* aad ugu sheegtaa inaad qorshaynayso in aad hasta shati aad gurga dhexdiisa ilmo ku qaban doono. [9]

© 2024 Xarunta Xeerka Daryeelka Carruurta (Child Care Law Center) p.1

Milkiilaha gurigaaga u dir nuqdi ah foormka ogeysiiska Guriga Milkiilaha/Qofka isla leh Ogeysiiskaaga ah in aad Xanaanda Ilmaha Aad Gurida Dhedxiida ku qaban doono (LIC 9151).

Foormka LIC 9151 kala soo bax barta internetka ee Qaybta Shatiga Daryeelka Bulshada:

- Af Ingiriisi: https://www.cdss.ca.gov/cdssweb/entres/forms/English/LIC9151.pdf.
- Af Isbaanish: https://www.cdss.ca.gov/cdssweb/entres/forms/spanish/lic9151sp.pdf.

**Waa goormee goorta ay tahay in aan milkiilahayga u sheegaa in guriga dhexdiisa aan ilmo ku xanaaneeyo?**

Haddii aad *bilaabayso* in guriga aad ka dhex furato xanaanada ilmaha, waa in milkiilahaaga aad qaab qoraal ah aad ugu sheegtaa **ugu yaraan 30** maalmood ka hor intaadan bilaabin daryeelka xanaanada ilmaha.[10]

Haddii aad *horayba* aad guri ilmo ku xanaanayn jirtay oo aad u guurtay guri cusub, Falanqeeyahaaga Barnaamijka Ruqsad Bixinta (Licensing Program Analyst (LPA)) u sheeg inuu milkiilahaaga guriga ku wargeliyo.

***Digniinta!*** Markaad shatiga ku soo wareejiso cinwaankaaga cusub, waxaa dhici karta in muddada ay tahay in milkiilahaaga guriga ka yar tahay 30 maalmood.[11]

**<u>Xadka Carruurta Aad Haynayso</u>**

**Miyuu Kiraystayaashu daryeeli karaan in ka badan 6 carruur ah gurigooda ay xanaanada ilmaha ku qaban karaan?**

**Waa laga yaabaa.** Haddii aad tahay qofka xanaano yar ee ilmaha guriga ku xanaaneeya, waxaad hayn kartaa **ilaa 8 caruur** *haddii* shuruudahan aad ka soo baxdo:

- Mulkiilahaaga guriga wuxuu saxiixayaa Foormka Oggolaanshaha ee Milkiilaha Guriga ee Foormka (LIC 9149) oo wuxuu calaamadaynaa sanduuqa sheegaya inaad in aad daryeelayso in ka badan 6 iyo ilaa 8 carruur;
- 2 da carruur ee dheeriga ahna waa inay ahaadaan:
    - Kuwa dhigta Iskuulka Xanaanada, Dugsiga Xanaanada Caruurta ee Xanaanada Ku Meel Gaarka ah, ama dugsiga hoose, **iyo**
    - 1 ama labada carruurba waa inay ahaadaan ugu yaraan ay ahaadaan 6 sano jir;
- Markaad daryeelayso in ka badan 6 carruur ah, waa inay carruurtu ku dhex jirin in ka badan 2 sibyaan oo isla mar jooga; **iyo**
- Qoysaska carruurta oo dhan ee aad hayso ku wargeli in aad ku dari doono 1 ama 2 ciyaal iskuulleey aad ku dari doonto.[12]

Foormkan isticmaal si aad qoysaska ugu wargeliso: Ogeysiiska Waalidka – Carruurta Dheeraadka ah ee Daryeelkaaga ku jira Foomka (LIC 9150). Adiga qaybta kor buuxi; waalidka ama masuulkana wuxuu buuxinayaa qaybta hoose.

Foormka Oggolaanshaha Mulkiilaha/Guryaha ee (LIC 9149) ka fiiri Daryeelka Bulshada

Bogga Qaybta shatiga:
- Af Ingiriis: https://www.cdss.ca.gov/cdssweb/entres/forms/English/LIC9149.pdf
- Af Isbaanish: https://www.cdss.ca.gov/cdssweb/entres/forms/Spanish/LIC9149SP.pdf.

**Ka warran haddii mulkiilahaygu uu igu dhaho guriga ku *ma* hayn kartid in ka badan 6 caruur xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ah?**

2 ikhtiyaar ayaad leedahay:

1. Tirada carruurta aad ku daryeesho ku xadid ilaa 6, **ama**
2. Soo qaado shatiga oo guriga aad ku xanaanayn karto ilmo badan. Tan waxay kuu ogolaanaysaa in guriga aad ku daryeesho ilaa 12 caruur ah adiga oo aan fasax milkiilahaaga uga baahanayn.

**Kiraystayaasha guriga ma ku qaban karaan in ka badan 12 carruur ah gurigooda wayn dhexdiisa?**

**Waa laga yaabaa.** Haddii aad tahay qof ilmo badan guriga dhexdiisa ku xanaaneeya, waxaad hayn kartaa **ilaa 14 caruur** *haddii* shuruudahan aad ka soo baxdo:

- Mulkiilahaaga guriga wuxuu saxiixayaa Foormka Oggolaanshaha ee Milkiilaha Guriga ee Foormka (LIC 9149) oo wuxuu calaamadaynaa sanduuqa sheegaya inaad in aad daryeelayso in ka badan 12 iyo ilaa 14 carruur;
- 2 da carruur ee dheeriga ahna waa inay ahaadaan:
    - Kuwa dhigta Iskuulka Xanaanada, Dugsiga Xanaanada Caruurta ee Xanaanada Ku Meel Gaarka ah, ama dugsiga hoose, **iyo**
    - 1 ama labada carruurba waa inay ahaadaan ugu yaraan ay ahaadaan 6 sano jir;

- Markaad daryeelayso in ka badan 12 carruur ah, waa inay carruurtu ku dhex jirin in ka badan 3 sibyaan oo isla mar jooga; **oo**
- Qoysaska carruurta oo dhan ee aad hayso ku wargeli in aad ku dari doono 1 ama 2 ciyaal iskuulleey aad ku dari doonto.[13]

Foormkan isticmaal si aad qoysaska ugu wargeliso: [Ogeysiiska](#) [Waalidka – Carruurta Dheeraadka ah ee Daryeelkaaga ku jira](#) [Foomka](#) (LIC 9150). Adiga qaybta kor buuxi; waalidka ama masuulkana wuxuu buuxinayaa qaybta hoose.

Qaybta [Uu Saxiixayo Milkiilaha/Guriga ka Fiiri Foomka](#) (LIC 9149) ee ku saabsan Daryeelka Bulshada Mareegta Qaybta shatiga:
- Af Ingiriis: https://www.cdss.ca.gov/cdssweb/entres/forms/English/LIC9149.pdf
- Af Isbaanish: https://www.cdss.ca.gov/cdssweb/entres/forms/Spanish/LIC9149SP.pdf.

**Ka warran haddii mulkiilahaygu uu igu dhaho guriga ku *ma* hayn kartid in ka badan 12 caruur xanaanada ilmaha ee gurigayga wayn dhexdiisa ah?**

Waxaad xaddidi kartaa tirada carruurta aad daryeesho ilaa 12, adiga oo aadan ogolaansho milkiilahaaga uga baahanayn.

**Mulkiilahaygu ma iigu amri karaa maalmaha iyo saacadaha aan ka shaqayn karo ee aan ilmo gurigayga ku xanaanaysan karo?**

**Maya** Mulkiilayaashu guriga ma xaddidi karaan ama kuu ma qaban karaan maalmo ama saacado oo aad ka shaqayn karto xanaanada guriga dhexdiisa adigoo shati u haysta ku qabanayso.14 Wakhtigaad rabto ayaad qabsan kartaa oo ay ku jiraan maalinta, magribka, iyo maalmaha fasaxa ee toddobaadkii wakhtigaad rabto.

**Laakin** waa inaad raacdaa sharciyada ku qoran heshiiskaaga kiraynta, sida inaad lacagta ijaarka aad isaga bixiso wakhtigeeda.

__**Arrimaha Caymiska iyo Lacagta**__

**Milkiilaha gurigayga ma igu qaaliyayn karaa guriga sababo la xiriira guriga aan ilmo ku xanaaneeyo darteed?**

**Maya** Mulkiilayaashu guriga ijaarka kugu ma qaaliyayn karo sababo *la xiriira* ilmo guriga aad ku xanaanayso adigoo shati u haysta darteed.[15]

**Laakin** mulkiilayaashu guriga ijaarka sababo kale ayay wax ugu dari karaan, intiiba ay raacayaan sharciyada dowladda gobolka iyo sharciyga xakamaynta ijaarka ee maxalliga.

**Mulkiilayaasha ma iwaydiisan karaa lacag badan ee ah lacagta la hormariyo sababo la xiriira guriga aan ilmaha ku xanaaneeyo darteed?**

**Haa.** Milkiilaha wuu ku kordhin karaa lacagta damaanada ee la dhigo maxaa yeelay waxaad guriga dhexdiisa ku haysataa xanaanada ilmaha oo shatiyaysan darteed. Tan waxay samayn karaan marka ugu horraysa ee aad bilowdo kiro, ama marka ay ogaadaan in aad guriga ilmo ku xanaanayn rabto.[16]

**Laakin** milkiilaha guriga kugu ma soo dalaci karo lacag ka badan:
- 2 bilood lacagteed ee guri aan bilnayn, **ama**
- 3 bilood lacagteed ee guri bilan.[17]

**Laga bilaabo 1da bisha Luulyo, 2024**, milkiilayaasha waxay kaliya ku dalaci karaan kiraystayaasha lacagta la dhigo ee ijaarka 1 bil, labada guryaha bilan *iyo* guriga aan bilnayn labaduba.[18]

Milkiilayaasha bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ayay ka qaadi karaan *ugu badnaan* lacagta la dhigo – xitaa haddii kiraystayaasha kale ay bixiyaan wax ka yar inta ugu badan.

**Ma inaan guriga geliyaa caymiska xanaanada ilmaha si aan u helo guri ilmaha aan ku hayo?**

**Maya.** Sharcigu kaaga ma baahna in aad caymis geliso guriga qoyska ee aad ilmo ku xanaanayso.[19]

**Laakin** Haddii aadan guriga caymis aadan gelin, dhammaan qoysaska barnaamijkaaga ee aad ilmaha u hayso *waa in* ay saxiixaan Foormka [Affideefit Ku Saabsan Caymiska Mas'uuliyadda ee Gurgiga Ilmaha lagu Hayo](#) (LIC 282). [20] Foormkan waxaa ku qoran in ay ogyihiin:
- In aadan ku jirin caymis, **iyo**
- Caymiska milkiilahaagu ma bixinayo wixii lagugu soo sheegto ee xanaanada ilmaha la xiriira. [21]

Foormka LIC 282 oo saxiixan waa inaad gelisaa feelka canug kasta.

***Digniinta!*** Dukunteiyadan oo dhan waa asturan yihiin. Daryeelka Jaaliyadda ee shatiga haysta waad la wadaagi

kartaa, laakiin milkiilahaaga guriga ha tusin hana siinin.

**Milkiilayaashu guriga ma ku qasbi karaa in qofka ilmaha guriga ku xanaaneeya in ay caymis gashadaan?**

**Maya.** Milkiilayaashu guriga ma ku qasbi karo in qofka ilmaha guriga ku xanaaneeya in ay caymis gashadaan. Waa sharci darro in milkiilaha guriga ku amro in qofka shatiga u haysta ee guriga ilmo ku xanaaneeyo ku amaro. [22]

**Maxaa dhacaya haddii milkiilahaha guriga uu dhaho in ceymiska milkiilayaasha gurigu la joojin karo ama aan loo cusboonaysiin karin sababtoo ah aniga oo guriga ilmo ku xanaanaynaayo darteed?**

Waa sharci-darro in shirkadaha caymisku ay kaa joojiyaan ama kuu diidaan inay cusbooneysiiyaan caymiska milkiilayaasha *kaliya* sababtoo ah guriga oo aad ilmo ku xanaanayso dartted. [23] Milkiilahaaga sharcigan inuu jiro u sheeg.

**Aniga haddii aan rabo ma gashan karaa caymiska xanaanada ilmaha?**

**Haa.** Xaqiiqdii, Xarunta Xeerka Daryeelka Carruurta *wuxuu si xoogan* ku talinayaa inaad guriga caymis geliso:

- Foomka LIC 282 *kaa ma* difaacayo in lagu dacweeyo. Waxa kaliya oo ay la macno tahay in waalidka ama mas'uulka ilmaha aysan haysan caymis.
- Caymiska milkiilaha guriga *ma daboolayo* sheegashada la xiriiradaboosho sheegashooyinka la xiriira xanaanada ilmaha ee aad guriga ku xanaanayso. [24]

**Milkiilahayga ama Ururka Milkiilayaasha Guriga (HOA) ma i waydiisan karaan in aan galo caymiska daryeelka ilmaha?**

**Haa,** laakiin *kaliya haddii* dhammaan shuruudahan oo dhan la buuxiyey:

- Horayba waad u la'hayd ama waad galaysaa caymiska xannaanada ilmaha;
- Milkiilahaaga ama ururka HOA ayaa kugu waydiinaya qaab *qoraal* in sharciga lagu daro;
- Caymiskaaga la ma joojin doono haddii aad ku darto milkiilahaaga ama HOA; **iyo**
- Milkiilahaaga ama ururkaaga HOA ayaa bixin doona kharash kasta oo dheeri ah ee caymiskaaga. [25]

**La Shaqaynta Milkiilayaasha iyo Deriska**

**Ka warran haddii mulkiilahayga guriga uu isku dayo inuu guriga isaaro ama uu ijaarka lacag ku kordhiyo sababtoo ah guriga in aan ilmo ku xanaaneeyo darteed?**

Waa sharci-darro in mulkiilahaagu uu guriga kaa saaro ama lacagta kugu kordhiyo *kaliya* sababtoo ah qorshaha aad qorshaynayso in guriga aad si sharci ah ilmo aad ugu xanaanayso darteed. [26]

Haddii ay sidan ku qabsato:

- Waxaad raadsataa oo aad la hadashaa qareen LawHelpCA, ama qareen ka raadso Adeegga Gudbinta Qareenka (Lawyer Referral Service) ee ururka qareennada ee degmadaada ama Ururka Qareennada Gobolka California (California State Bar Association), ka hor inta milkiilaha guriga aad u jawaabin;
- Ururka xuuqaha kiraystayaasha ee degmadaada la hadal;
- Ka fekir inaad cabasho gurayn u gudbiso Waaxda Xuquuqda Madaniga (Civil Rights Department); **iyo**
- Dhaqso uga falceli. Kiisaska guri ka saarida iyo ijaar ku kordhiska la xiriira wakhtiyada u degsan ee loo qabto aad bay u xadidan tahay oo dib ha ugu dhicin. Waxay ku xiran tahay sababta, waxaa dhici karta in aad haysato **3 ama 5 maalmood oo kaliya** in aad uga soo jawaab celiso.

***Digniinta!*** Haddii wakhtiga laguu qabto in aad uga soo jawaab celiso aad dhaafto guri ka saaridda, waxaa dhici karta in kiiskaaga aad sidaa ku waydo.

**Maxaa dhacaya haddii mulkiilaha guriga uu soo faragasho xanaanada ilmaha oo guriga dhexdiisa iiga furan ama isku dabo inuu iga xiro?**

Xuquuq baad leedahay. Milkiilaha looma oggola inuu kuu sheego sida aad u qabsan la'hayd hawshaada xananada ilmaha ee guriga dhexdiisa ama inuu kugu yiraahdo xir ma samayn karo.

Hadday uu sidaas sameeyo, waa inaad markiiba anaga aad nala soo xiriirtaa.
**Xarunta Xeerka Daryeelka Carruurta**
www.childcarelaw.org/help, 415-558-8005
qatka 1.

**Sideen xiriir wanaagsan ula yeelan karaa milkiilaha gurigayga iyo deriskayga?**

Milkiilayaal ama deriska qaar ayaa waxaa laga yaabaa inay u maleynayaan inaad ku jiro hawl ah *xarunta daryeelka carruurta*, oo aysan ahayn xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa. Taas waad u macnayn kartaa:

- Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka gurigooda waa inay ka dhigaan mid nadiif ah oo ayna ka dhigaan

shaqooda daryeelka ilmaha mid ammaan ah. Taas ayaa waxay ka dhigaysaa dad ada u wanaagsan oo guri laga ijaaro.
- Dadka guriga ku fidiya daryeel carruur waxay bixiyaan adeeg aad muhiim ah iyo waxayna buuxiyaan baahi ay dad badan oo xaafaddaha degan ay qabaan.
- Dadka guriga ilmaha ku xanaaneeya waxay daryeelaan tiro yar oo carruur ah.
- Dadka guriga ilmaha ku xanaaneeya waa idhaha iyo dheggaha xaafadda.
- Jaaiyadda Daryeelka ee Shatiga bixisa ayaa kor kala socota guryaha xanaanada carruurta laga bixiyo oo iyaga ayaa sanadkiiba hal jeer booqasho la ma filaan ah ugu taga guriga xanaanada carruurta laga bixiyo.

Milkiilaha gurigaaga u sheeg:
- Inaad yaraynayso halaynta guriga aad ijaarka ugu jirto oo lacagta ay kaa hayaan ay u isticmaali karaan inay ku bixiyaan wixii aad guriga ka halayso goorta aad ka guurayso;
- Carruurta aad hayso ku ekay sharciyan inta shatigaaga kuu ogol yahay;
- Ha ku xadgubin sharciga sawaxanka, tusaale ahaan in carruurta aad guriga ku hayso inta lagu jiro subaxii hore iyo fiidkii dambe;
- Gaadiid dheeri ah ma keeni doonto sababtoo ah waxaan daryeelaa oo kaliya tiro yar oo carruur ah, oo wakhtiyada keenista ilmaha/saacaddaha soo qaadista ayaa inta badan isdaba joog ah;
- Inta dadaalkaaga ah dadlaa si aad u dhawrto isticmaalka biyaha iyo tamarta; **iyo**
- Ilmaha kaligood marnaba ha ugu tagin. Waa sharci inaad raacdo sharciga si shatiga aad u sii haysato.[27]

**Halkeen ka heli karaa caawinaad dhanka sharciga ah ee bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka quseeya?**

- Haddii aad tahay kireyste dakhligeeda hooseeya oo aadna hesho ogaysiis kuu sheegaya in guriga lagaa saarayo ama si sharci daro ah ijaarka uu kuugu kordhiyo milkiilaha gurigaaga, booqo LawHelpCA https://www.lawhelpca.org/ si aad u hesho qareen ku taqasusay arrimaha guryaha iyo waxyaabo kale ee ilaha guryaha ku saabsan.
- Haddii aad tahay kirayste degan Degmada Los Angeles County, Qareen Dadwayne kala 213- 385-2977 qatka 300, ama https://publiccounsel.org/services/child-care-day-care/.
- Kaliforniya waxay leedahay ururo badan oo u dooda xuquuqda guryaynta bulshada oo adiga wax kuula qaban kara. Interneetka ka raadi “tenant rights organization near you.” ("Ururka xuquuqda kiraystaha ee kuu dhow.")
- Sidoo kale waxaad caawinaad ka heli kartaa qareenno gaar ah iyo qareenno dhanka sharciga ruryaha oo arrimaha guryaha kaala shaqan karo adiga lacag yar iska bixinaya. La xiriir ururkaaga qareenada ee degmadaaada ama Ururka Qareenada Gobolka Kaliforniya inay kuu gudbiyaan.
- Waaxda Arrimaha Macaamiisha ee Kaliforniya waxay qabaan Hage caawiya dadka guryaha ijaarka ugu jira. Raadi "Kiraystayaasha California" (“California Tenants”) halkan www.dca.ca.gov.

**© Child Care Law Center 2024**

Waxaa qoray qareennada jooga Xarunta Xeerka Daryeelka Carruurta. Si aad u hesho ogolaansho ah inaad nuqul ka sameyso, gudbiso ama la wadaagto macluumaadkan, iimeel noogu soo dir: info@childcarelaw.org

**Macluumaad *Sharci* – Oo Ma aha Talo *Sharci*.** Daabacaadan waxaa loogu talagaly inay kuu fidiso macluumaad sharci ah; maaha talo sharci. Xarunta Xannaanada Carruurta maaha qareenkaaga. Sharcigu inta badan wuu is-isbedelaa. Wixii talo ah ee ku saabsan xaaladdaada gaarka ah, qareen la xiriir.

**Dhammaad:** Qoraallada hoose waxaa laga soo xirtay linkiga sharciyada California iyo xuquuqahaaga mawduucan quseeya. Iska akhri iyo/ama la xiriir maktabadda sharciga deegaankaaga. Waxaa dhici karta inay kaa caawiyaan inaad fahamto sharciyada.

---

**Dhammaad:**

1 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

2 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1596.78(a)-(d).

3 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

4 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1596.78(d); 1597.45(e).

[5] Guryaha xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa waxaa ka mid ah "…qayba la degan yahay ee la ijaartay, la liisgaraystay, ama milki ahaan loo leeyahay" sida hoos yimaada Qaybta 455.2 ee ah Sarciga 2022 ee Xeerka California Building Code, ee quseeya ammaanka dabka ee loogu talagalay guryaha xanaanada carruurta. Qodobka 14 ee la xiriira badbaadada dabka ee Xeerka Sharciga California ee kaabaya Xeerka Dhismaha California waxa uu qeexayaa "qaybta deggenaanshaha" sida "qayb la dego," oo ay ku jiraan guryaha wareegga ah iyo guryaha la farsameeyey. Cal. Xeerka Sharciyada., qodobka. 14, § 1267.00 (a).

[6] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.43(a).

[7] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c), Cal. Civ. Xeerka Madaniga ee § 1942.5(a) (Guri ka saarida ama hanjabaad ka saarid aargoosi loo gaysto kiraystaha si sharci ah oo nabada leh oo uu u isticmaalo xuquuq kasta oo sharci ah waa xadgudub sharci).

[8] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(d).

[9] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(d)(1). (Arji qortaha shatiga ee guriga ku bixinaya xanaanada ilmaha waa inuu ku caddeeyaa iyadoo ciqaab lagu mutaysanaayo been ka sheegida inay ogeysiis siyeen milkiiligooda guriga. Fiiri barta "Codsiga Shatiga Guriga Daryeelka Carruurta Qoyska (LIC 279)": http://www.cdss.ca.gov/cdssweb/entres/forms/English/LIC279.pdf).

[10] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(d)(1).

[11] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(d)(2).

[12] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.44(a)-(d).

[13] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.465(a)-(d).

[14] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

[15] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(b)-(c); *See* Cal. Civ. Xeerka Madaniga ee § 1942.5(a) (kordhinaya lacagta ijaarka qaab aargoosi loo gaysto kiraystaha si sharci ah oo nabada leh oo uu u isticmaalo xuquuq kasta oo sharci ah waa xadgudub sharci).

[16] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(d)(4).

[17] Cal. Civ. Xeerka Madaniga § 1950.5(c).

[18] Cal. Civ. Xeerka Madaniga § 1950.5(c).

[19] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

[20] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

[21] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

[22] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41.

[23] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c); Cal. Ins. Xeerka §§ 676 (guryaha xanaanada ilmaha qoyska ku ma qorna liiska sababta la ogol yahay in la joojiyo sharciga caymiska), 676.1 (iyaga oo sheegaya in shirkadaha caymisku aanay si sabab la'aan ah ugu fashilmi karin inay cusboonaysiin waayaan sharciga sababtoo ah qofka caymiska ku jira wuxuu leeyahay guriga xanaada carruurta qoyska ku bixiyo iyo caymiska uu ku jiro mulkiilaha gurigu ma dabooli karaan mas'uuliyadda ka dhalata ama la xiriira guriga xanaanada carruurta qoyska). 679.74 (ka mamnuucida shirkadaha caymisku inay joojiyaan ama diidaan codsiga caymiska deegaanka ee ku salaysan isha dakhliga).

[24] Cal. Ins. Xeerka Madaniga § 676.1(c). ("Waa inuu noqdaa mid ka soo horjeedda sharciga guud in caymiska guryaha la deggan yahay uu bixiyo caymiska mas'uuliyadda khasaaraha ka dhasha, ama la xiriira, hawlgalka guriga xannaanada maalinta qoyska. Caymiskan waa in lagu bixiyaa oo keliya taageero gaar ah ama sharciyada caymiska ee khidmadaha la qiimeeyay lagana soo ururiyay.").

[25] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(b). (Xeerarkan caymis ee isku wada midka ah ayaa lagu dabaqaa goorta xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ilmo lagu hayo kaas oo lala wadaago booska uu ka shaqeeyo Ururka Milkiilayaasha Guryaha).

[26] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c), Cal. Civ. Xeerka Madaniga ee § 1942.5(a) (Guri ka saarida ama hanjabaad ka saarid aargoosi loo gaysto kiraystaha si sharci ah oo nabada leh oo uu u isticmaalo

xuquuq kasta oo sharci ah waa xadgudub sharci).

27 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1596.78(a)-(d).